IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 6 Oktoobar 1980 L. 1 R 10

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA :** waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA :** Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

**QAYBTA KOOWAAD**

**SHARCI**

SHARCI L. 26 ee 15 Sebteember 1980, Heshiis dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Ciraaq

مرسوم جمهوري رقم ٩٥ الصادر في ١٩ أغسطس ١٩٨٠

**QAYBTA LABAAD**

**XEER**

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 95 ee 19 Agoosto 1980, meel marin Heshiis.

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH**

MAXKAMADDA GOBOKA BANAAIR, 1.3.1978, Lumid Jeeg Wareega L. 049126 ku qoran Sh. So. 15.079 ay leedahay Iskaasha. Dhuxusha Cadceed L. 602

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, 16.9.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 260171 ku qoran Sh. So. 8.500 uu leeyahay Yuusuf Axmed Xersi

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HDEXE 11.6.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 693658 ku qoran Sh. So. 5.000 uu leeyahay Axmed Suldaan Cali L. 604

MAXKAMADDA GOBOLKA, BANAADIR, 6.7.1980, Lumid Buug Kayd L. 16575 ku qoran Sh. So. 1347 uu leeyahay Maxamuud Siyaad Cabdikariin L. 605

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 25.9.1980, Lumid Jeeg Wareega 120113 ku qoran Sh.So. 39.600 uu leeyahay Warsame Qoriyow Macallin L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 25.9.1980, Lumid Jeeg Wareega L. 120112 ku qoran Sh. So 29.000 L. 607

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 23.8.1980 Lumid Buug Kayd L. 11307 ku qoran Sh. So. 600 uu leeyahay Cismaan Yuusuf Maxamuud L. 608

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.10.1980 Lumid Jeega Wareega Lamb. 154976 L. 609

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.10.1980 Lumid Jeeg Waree lamb. 226221 L. 610

MAXKAMADDA GOBOLKA BANADDIR 1.10.1980 Lumid Jeega Wareega Lamb. 153870 L. 611

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.9.1980 Lumid Buuga Keydka Lamb. 16412 Lamb. 612

## *SAXID QALAD*

Faafinta Rasmiga ah ee soo baxday 2 Maaji 1980, Bog 587 Go'aanka ku qoran waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran Shs. 4.020

## QAYBTA *KOOWAAD*

SHARCI L. 26 ee 15 Sebt 1980 Heshps Dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Ciraaq

## MADAX*WEYNAHA J.* D. S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qodobadiisa 78 (1) iyo 82 (4) iyo 67 (5)

ISAGOO SALDHIG Looga dhigayo oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

## *WUXUU* SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### QODOB*KA 1*AAD

1) Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Ciraaq oo ku saabsan Brotokol gaar ah oo lagu dhisayo Machadka tababarka Macalimiinta Soomaaliyeed.

2) Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikhdu markay ahayd 23 Jennaayo 1980.

3) Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

### QODOB*KA* 2AAD

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska lagu soo tilmaamay Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci oo la mida sharciyada Dalka, dhaqan gelintiisuna waxaa la waafijinayaa qod. 72 (1) ee Dastuurka J.D.S. iyo qod. 14aad ee heshiiska (Brotokolka).

### *QODOBKA 3AAD*

Sharcigani wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa maalinta ku xigta oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 15 Seteember 1980

مرسوم جمهوري رقم ٩٥ الصادر في ١٩ اغسطس ١٩٨٠
وثيقة التصديق

## جمهورية الصومال الديمقراطية
## الرئيس

بعد الاطلاع على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة والمادة الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية.

وبعد الاطلاع على موافقة مجلس الشعب بتاريخ ٢١ يونيو ١٩٨٠م على بروتوكول الخاص بانشاء معهد لاعداد المعلمين في الصومال بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة الجمهورية العراقية الموقع عليه في مقديشو بتاريخ ١٩٨٠/١/٢٣م.

يصدر المرسوم التالي

### المادة الاولى

تم التصديق على البروتوكول الخاص بانشاء معهد لاعداد المعلمين في الصومال المبرم بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة الجمهورية العراقية الموقع عليه في مقديشو بتاريخ ١٩٨٠/١/٢٣م.

### المادة الثانية

للبروتوكول قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل به اعتبارا من تاريخ تبادل وثائق التصديق وكفا للمادة الرابعة عشر من البروتوكول .

### المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية، وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .
مقديشوه ، في ١٩٨٠/٨/١٩م .

اللواء محمد سياد بري

## *QAYBTA LABAAD*

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 95 ee 19 Agoosto 1980, Meelmarin heshiis

**MADAXWEYNAHA J. D. S.**

ISAGOO ARKAY: Qodobka 67aad xubintiisa 5aad, Qodobka 82aad xuintiisa 4aad iyo Qodobka 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAAYA Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee taariikhdiisu tahay 21kii Juun 1980 ee Brotokoolka Gaar ahaaneed ee lagu abuurayo Machadka tababarka ee Macallimiinta, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyada Ciraaq.

*Wuxuu soo saarayaa* **xeerka** *soo* **socda**:-

### *QODOBKA 1AAD*

Brotokoolka Gaar ahaaneed ee lagu dhisayo Machadka Tababarka ee Macallimiinta dhexmarayna dawladda Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo dawladda Jamhuuriyadda Ciraaq laguna saxiixday Muqdisho, 23kii Janaayo, 1980, WAA LA MEELMARIYEY.

### QDOBKA 2AAD

Brotokoolku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuu dhaqan gelayaa marka la isudhaafsado waraaqaha meelmarinta sida waafaqsan Qodobka 14aad ee Brotokoolkan.

### QODOBKA 3AAD

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19.8.1980

**SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE**
**MADAXWEYNAHA**

**MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR**

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D. L. 9.9.1965 N 2; Lumid Jeeg Wareega Lamb. yahay 049126 kuna qoran tahay Sh. So. 15.079 Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe

**WUXUU AMRAYAA**

In loo cusbooneysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood dekeretada lagu shaaciyo Faafinta ras miga ah ee dawladda.

**WAXAA LA CODSANAYAA**

In jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Iskaashatada Dhuxusha Cadceed ama qof isla asaga ka sita wakaalad shrci ah, ayadoo la sugaayo mudada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdish, 3. 7. 1978

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADA GOB. BANAADIR**
**CABDULLAHI MAXAMED MAAX**

L. 602

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE**

HADDUU ARKAY: Akhriyey dalabka uu soo qortay Jaalle Yuusuf Axmed Xersi oo sheeganaaya in uu ka dhumay Jeega Wareega lamb. 260171, ee ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 8.500 (Sideedkun shanboqol) Shs.

HADUU ARKAY: Qodobka 69 Xeer L. 2 ee soo baxay 9.9.1965 wuxuu cadeeynayaa in uu ka dhumay Jeegaas lamb sare lagu sheegay Ninka la yiraahdo Yuusuf Axmed Xersi.

**WUXUU AMRAYAA**

In loo cusbooneysiiyo Jeegaa war. lamb sare ku xusan yahay kuna qoran lacagta aan kor ku soo sheegnay muddo dhan 15 (toban iyo shan) casho gudaheeda laga bilaabo marka lagu qoro Faafinta Rsmiga ah.

Waxaa kaloo la amrayaa in jeegaas gacanta laga saaro ninka la yiraahdo Yuusuf Axmed Xersi, ama cidii ka wadata wakaalad Rasmi ah hadaan la helin qof kale oo sharci u haysta.

Kismaayo, 16 Sebt. 1980.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE**
*Dr. Cumar Yuusuf Faarax*

L. 603

## MAXKAMADDA GOBOLKA J. DHEXE

HADDUU ARKAY; Dacwadda horay ku qoran

MARKUU OGAADAY; waxaay ku saabsantahay iyo ogeysiiska Bangiga W. 003 ee 8.1.1980 Laanta Jilib B. Ganacsiga iyo Kaydka S. Laanta Jilib.

wuxuu ogaaday in aay tahay shaqadiisa.
HADDUU ARKAY: Qod. 69 D. L. 9.9.1965 N 2

Wuxuu cadeynayaa in Jeegaas war. L. 693658 ee 3010.79 ku qoran Axmed Suldaan Cali Sh. So. 5.000 leeyahay.

Wuxuu amrayaa in loo sameeyo Jeeg wareega ee cusub Ninka kor ku Magacaaban 15 maalmood kaddib, markii amarkaan lagu Shaaciyo Faafin Rasmiga ah ee Dawladda.

### CODSI

Waxaa la codsanayaa in Jeegga war. ee la sameeyn doono gacanta laga saaro Axmed Suldaan Cali ama qof asaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 15 kor xusan.

Jilib; 11. 6. 1980

**GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. DHEXE**
**Dr. Xuseen Cabdi Abiikar**

L. 604

## MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Buug Keyd dhumay oo lambarkii-su ahaa 16575 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1.347 uu iska lahaa Maxamuud Siyid Cabdikariin sida ku cad warqadda lamb. 02256 Taariikh 6. 7. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

### *WUXUU XEERIYEY*

In la baabi'iyo Buug keyd Lamb 16575. oo ku qoran Magaca Maxamuud Siyid Cabdikariin ayna ku jirto Sh. So. 1.347

### WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Xarunta u beddelo Maxamuud Siyid Cabdikariin buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR**
*Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax*

L. 605

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 120113 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Badhaadhe kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 39.600 uu iska lahaa Warsame Qoriyow Macalin sida ku cad warqadda lamb 009594 Taariikh 25.9.1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Badhaadhe

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeeg Wareega lamb. 120113 oo ku qoran magaca Warsame Qoriyo Macallin ayna ku jirto Sh. So. 39.600

### WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Badhaadho u bedelo Warsame Qoriyow Macallin Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka djb markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta go' aanka lagu da\baco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 9. 1980,

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**
**Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax**

L. 606

## MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADUU HUBIYEY: in Jeegga wa. dhumay oo lambarkiisu ahaa 120112 lagana soo soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed; Laanta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 29.000 uu iska lahaa Warsame Qoriyow Ma callin sida ku cad warqadda lamb. 009594 Taariikh. 25.9.80 Baniga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Ba dhaadhe.

### *WUXUU XEERIYEY*

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 120112 oo ku qoran magaca Warsame Qoriyow Macalin ayna ku jirto Sh. So. 29.000

### *WUXUU FASAXAY*

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Badhaadhe u bedelo Warsame Qoriyow Macallin Jeega wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta Go' aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadia Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 9. 1980

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**
**Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax**

L. 607

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Seyd dhumay oo lambarkii su ahaa 11307 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 600 uu iska lahaa Cismaan Yuusuf Maxa muud sida ku cad warqadda lamb. 5514 Taariikh 23.8.1980 oo bangiga Kanacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'iyo Buug Keydka Lamb. 11307 oo ku qoran Magaca Cismaan Yuusuf Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 600

**WUXUU FASAXAY**

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Cismaan Yuusuf Maxamuud Buuga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 23.8.1980

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**
**Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax**

L. 608

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 154976 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So.10. 000 uu iska lahaa Yaasiin Cali Yuusuf sida ku cad warqadda lmb. 009837 Taariikh 1. 10.1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

HADDUU ARKAY Qod: 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1065

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 154976 oo ku qoran Magaca Yaasiin Cali Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 10.000

### WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Berbera u bedelo Yaasiin CaliYuusuf Jeega Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ahee Jamhuuriydda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho,1. 10. 1980

**GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR**

L. 609

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkii-su ahaa 226211 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 22.000 uu iska lahaa Cabdullaahi Cabduraxmaan Sida ku cad warqadda lamb. Taariikh 28. 9. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

### *WUXUU XEERIYEY*

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 226211 oo ku qoran Magaca Cabdulqaadir ayna ku jirto Sh. So. 22.000

### *WUXUU FASAXAY*

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Berbera u bedelo Cabdullaahi Cabduraxmaan Yuusuf Jeeg Wreega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 1. 10. 1980

**GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR**
*Dr. Cabdullaahi* **Maxamed Maax**

L. 610

MAX. GOBOL. BANAADIR

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Jeega Wareega dhumay oo lamabrkiisu ahaa 153870 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 7.500 uu iska lahaa Maxamed Xasan sida ku cad warqadda lamb. Taariikh 28. 9. 1980 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera.

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 153870 oo ku qoran Magaca Maxamed Xasan ayna ku jirto Sh. So. 7.5000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka laanta Berbera u bedelo Maxamed Xasan Jeega wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 Maalmood Maaljnta Go'aanka daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1. 10. 1980

GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR
*Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax*

L. 611

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOKA BANAADIR

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HIBIYEY: In Buuga Keydka dhumay oo lamabrkiisu ahaa 16412 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 307 uu iska lahaa Xasan Eybakar Maxamuud sida ku cad warqadda lambar 03269 taariikh 27.9.80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka Lamb 16.412 oo ku qoran Magaca Xasan Eybakar Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 307

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo Xasan Eybakar Maxamuud Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii in ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27. 9. 1980

Dr. CABDULLAAHI MAXAMED MAAX
GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOKA BANAADIR

L. 612

**GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOKA BANAADIR**

HADUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBSADAY in Buuga Keydka dhumay lambarkiisu ahaa 14143 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keyd-Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 12.050 uu iska lahaa Maka Xaaji Warsame sida ku ca... warqadda lamb 4695 Taariikh oo bangiga Ganacs... ga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: qod 69 sharciga lamb 2 ee 9.9.1965.

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'iyo Buuga Keydka lamb. 14143 oo ku qoran Magaca Maka Xaaji Warsame ayna ku jirto Sh. So. 12.050

**WUXUU FASAXAY**

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Maka Xaaji Warsame buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka la... daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 19. 7. 1980

**GUDD. MAX. GOBOL. BANAADIR**
**K.S. Dr. KHALIIF XIRSI CALI**

L. 613

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

### CABDILLAAHI MAXAMED CIGAAL

DEK. LAMB. 7 1980

Cabdillaahi Maxamed Cigaal wuxuu yimid Maxkamadda asagoo oo ah qofka haystay Jeegga Lambarkiisu yahay 126094 oo ay ku taalay lacag dhan Sh. So. 5000/00 kuna qoran magii-sa, wuxuuna keenay Maxkamadda Warqadda Lambarkeedu yahay 132 ee Taariikhdeedu tahay 17. 8. 1980 oo ka soo baxay Xafiiska Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Ammaahda Hargeysa.

waxaan halkan ku bixinayaa Amarkan aniga oo cuskanaya Qodobka 27 Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 29kii Sebtember 1965 in Jeegga Wareegga ee Lambarkiisu yahay 126094 la tiro Waxaanan amrayaa.

A) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

B) Lacagta ah So. Shs, 5000/00 in Baankigu u celiyo Cabdullaahi Maxamed Cigaal 30 casho gudahood marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda

la qoray 23. 8. 1980.

**(IBRAAHIM FAARAX MAXAMED)**
**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA**

L. 614